



DEGMADA SAN DIEGO

SAYGA AJENDAHA

GUDDIGA KORJOOGEYAASHA

BANNAAN
Degmada Koowaad

JOEL ANDERSON
Degmada Labaad

TERRA LAWSON-REMER
Degmada Saddexaad

MONICA MONTGOMERY STEPPE
Degmada Afraad

JIM DESMOND
Degmada Shanaad

TAARIKHDA: Abriil 22, 2025

XX

KU SOCOTA: Guddiga Kormeerayaasha

UJEEDDO

DHEGAYSIGA DADWEYNAHA EE LA OGAYSIIYAY: MADASHA BULSHADA TRUTH ACT EE KHUSEEYA SOCDAALKA IYO DHAQANGALINTA XADUUDAHA DADYOWGA INTA LAGU JIRO 2024 (DEGMOOYINKA: DHAMMAAN)

DULMAR

2016, Gobolka California wuxuu soo rogay Xeerka Dib u Eegista Hufnaanta Wareejinta aan Cadaaladda ahayn iyo Haynta), oo sidoo kale loo yaqaan "TRUTH Act." Ayada oo qayb ka ah TRUTH Act, Xeerka Dowladda Farqada 7283.1(d) wuxuu shardi ka dhigayaa in cidda maamulaysa ee ismaamulku ay qabato madal bulsho oo sanadle ah haddii hay'adda dhaqangalinta sharciga ee ismaamulkaas dhexdiisa haddiiba socdaalka federaalka iyo xaduudaha (ICE) la heli karo, sida ku cad Xeerka, ee shakhsiyaadka sannadkii hore.

Tani waa codsi ku aaddan Guddiga Kormeerayaasha inay qabtaan Xeerka RUNTA ee madasha bulshada si loo bixiyo macluumaadka kusaabsan isticmaalka ICE ee shakhsiyaadyada, iyo inay helaan islamarkaana ay tixgeliyaan faallooyinka dadweynaha. Madashan waxaa dadweynaha la ogeysiiyay Maarso 21, 2025. Inta lagu gudajiro madasha, Waaxda Booliiska gobolka waxay kasoo warbixin doontaa isdhexgalka Waaxda iyo xiriirka kala dhexeeya ICE inta lagu gudajiro 2024. Ma jiraan waaxaha Degmooyin kale oo siiyay adeegga ICE, sida lagu qeexay Sharciga, shaqsiyaadka sanadkii 2024.

TALO (TALOYINKA)

SARKAALKA MADAXA MAAMULKA

1. Ayaa qabanaaya madal dadwayne Abriil 22, 2025 sida ku cad Xerka Dawlada Farqada 7283.1(d).
2. Ka hel warbixin Waaxda Booliiska gobolka ee kusaabsan isticmaalka ICE ee shakhsiyaadyada inta lagu gudajiro 2024.

BAYAANKA SAAMAYNTA SINAANTA

Si loo kordhiyo daahfurnaanta iyo helitaanka macluumaadka bulshada, Ismaamulku wuxuu qaban doonaa madal bulsho waxuuna heli doonaa faalo dadweyne oo khusaysa waax kasta oo Ismaamulku leeyahay taasoo ogolaansho siisa Socdaalka iyo Dhaqangalinta Xaduudaha (ICE) taas oo leh gunaanadka xogta. Macluumaadka laga warbixiyay waxaa kujira tirada shakhsiyaadka ay

UJEEDDO: DHEGAYSIGA DADWEYNAHA EE LA OGAYSIIYAY: DHEGAYSIGA DADWEYNAHA EE LA OGYAHAY: MADASHA BULSHADA TRUTH ACT EE KHUSEEYA SOCDAALKA IYO DHAQANGALINTA XADUUDAHA DADYOWGA INTA LAGU JIRO 2024 (DEGMOOYINKA: DHAMMAAN)

wakaaladdu siisay isticmaalka ICE iyo sifooyinkooda tirakoobka, taariikhda isticmaalka ICE la bixiyay, iyo sida isticmaalka ICE loo bixiyay, ha ahaato haynta, wareejinta, codsiga wargalinta mise habab kale.

BAYAANKA SAAMAYNTA WAARITAANKA

Talaabooyinka la soo jeediyay ee lagu qabanayo Madasha Bulshada Dib u eegista Hufnaanta ee Badalka Aan cadaaladda ahayn iyo Xeerka Haynta (TRUTH) iyo helitaanka warbixinta ka imaanaysa Waaxda Booliska gobolka ee khusaysa helitaanka Socdaalka iyo Dhaqangalinta Xaduudaha ee shakhsiyaadka inta lagu jiro 2024 waxay ka qaybqaadanayaan Hiigsityada Waaritaanka Ismaamulka San Diego ee la falgalidda bulshada iyo bixinta helitaan cadaalad ah loona siman yahay. Si bulshada loola falgalo qaabab waxtar leh loona helo wax kubbiirinta daneeyeyaasha hanaanka bulshada, Ismaamulka San Diego waxay qabanaysaa madal bulsho oo ka dhacaysa meel bulshadu ka heli karto oo ugu yaraana leh 30 maalmood oo ogaysiis dadweyne ah iyadoo yoolku yahay diyaarinta hanaanka bulshada kaasoo ku dhiirrigalinaya dadka iyo daneeyeyaasha in ay ka qaybqaataan go'aannada saamaynaya noloshooda iyo bulshooyinka. Intaa waxaa dheer, ayada oo lagu marti qaadayo faalada dadweynaha dhammaan xubnaha bulshada ee raba in ay ka qaybqaataan, lana siinayo agabo la tarjumay iyo adeegyo tarjumaad oo ah Carabiga, Shiinayska (Mandarin), Korean, Persian (Farsi iyo Dari), Soomaali, Isbaanish, Filipino (Tagalog), iyo Vietnamese, Madasha Dadweynaha ee TRUTH Act ee lasoo jeediyay waxay sii dheeraynaysaa aragtida Ismaamulka San Diego ee maalgashiga helitaanka cadaaladda iyo sinaanta ah ee ay dhammaan dadka deegaanku u helayaan adeegyada Ismaamulka.

SAAMAYNTA DHAQAALAHA

Majirto saamayn dhaqaale oo la xiriirta tallooyinka qabashada madasha bulshada iyo helitaanka warbixin khusaysa helitaamka ICE ee shakhsiyaadka. Haddii la ogolaado, majiri doono isbadal ku imaanaya kharashaadka Maalgalinta Guud mana jiraan sanado shaqaale oo dheeraad ah.

WARBIXINTA SAAMAYNTA GANACSIGA MA KHUSAYSO

WARBIXINTA GUDDIGA TALO BIXINTA MA KHUSAYSO

ASALKA HORE

2016, Gobolka California wuxuu soo rogay Xeerka Dib u Eegista Hufnaanta Wareejinta aan Cadaaladda ahayn iyo Haynta, sidoo kale loo yaqaan (Act) "TRUTH Act." Ayada oo qayb ka ah TRUTH Act, Xeerka Dowladda Farqada 7283.1(d) wuxuu shardi ka dhigayaa in cidda maamulaysa ee ismaamulku ay qabato madal dadweyne oo sanadle ah haddii hay'adda dhaqangalinta sharciga ee ismaamulkaas dhexdiisa haddiiba socdaalka federaalka iyo xaduudaha (ICE) la heli karo, sida ku cad Xeerka, ee shakhsiyaadka sannadkii hore. Madashaanu waa in ay ahaataa mid bulshada u furan, oo kajirta meel la gaari karo, sidoo kalena leh ogaysiis 30 maalmood, si dadweynaha loo siiyo macluumaadka ku saabsan helitaanka ICE ee shakhsiyaadka iyo helitaanka iyo tixgalinta faalada bulshada.

UJEEDDO: DHEGAYSIGA DADWEYNAHA EE LA OGAYSIIYAY: DHEGAYSIGA DADWEYNAHA EE LA OGYAHAY: MADASHA BULSHADA TRUTH ACT EE KHUSEEYA SOCDAALKA IYO DHAQANGALINTA XADUUDAHA DADYOWGA INTA LAGU JIRO 2024 (DEGMOOYINKA: DHAMMAAN)

Xeerka TRUTH Act wuxuu qeexayaa hay'adaha dhaqangalinta shaciga gudaha sida kuwa loo ogolaaday in ay sharciga mariyaan xaaladaha danbiyada, shuruucda ama xeerarka gudaha; ama inay ka shaqeeyaan xabsiyada ama ay ilaaliyaan haynta shakhsiyaadka xabsiyada kujira; ama in ay ka shaqeeyaan goobaha carruurta lagu xiro ama ilaaliyaan haynta shakhsiyaadka kujira goobaha caruurta lagu xiro; ama in ay maamulaan u hogaansamidda shuruudaha sii daynta ama cafiska. Sharcigu wuxuu qeexayaa isticmaalka ICE wuxuuna faahfaahinayaa shuruudaha isticmaalka lagu bixin karo.

Markay ahayd Maarso 21, 2025 ogaysiinta madasha bulshada ee Xeerka RUNTA ee la qabanayo Abriil 22, 2025, inta lagu gudajiro shirka guddiga kormeerayaasha, kaasoo u furan dadweynaha, ayaa la soo saaray iyadoo la raacayo shuruudaha sharciga ee ogeysiiska 30-ka maalmood ka hor madasha. Inta lagu gudajiro madasha, Waaxda Booliiska gobolka waxay kasoo warbixin doontaa isdhexgalka Waaxda iyo xiriirka kala dhexeeya ICE inta lagu gudajiro 2024. Majirto waax Ismaamul kale oo la siiyay isticmaalka ICE, sida lagu qeexay Xeerka, shakhsiyaadyada intii lagu jgudairay sannadkii hore.

XIRIIRKA KALA DHEXEYYA QORSHAHA XEELADEYSAN EE ISMAAMULKA SAN DIEGO

Madasha bulshada TRUTH Act waxa uu taageeraa Xoojinta iyo dadaallada Bulshada ee Qorshaha Xeeladeysan 2025-2030 ee Degmada San Diego iyadoo macluumaadka lala wadaagayo dadweynaha si waafaqsan sharciga gobolka.

Si xushmad leh loo soo gudbiyay,



Andrew Strong for

EBONY N. SHELTON
SARKAALKA MADAXA MAAMULKA

**LIFAAQA (YADA)
MA KHUSAYSO**